

Hagid

Ka jawaabidda COVID-19 - Guga 2021 (Guudmar)

Waxaa la daabacay 22 Nofeembar 2021

Tusmada

1.
Khariidadda dariiqa looga baxayo xayiraadda
2.
Afar tallaabo

Daabac boggan

1. Khariidadda dariiqa looga baxayo xayiraadda

Laga bilaabo 8-da Maarso, dadka ku nool England waxay arki doonaan xaddidaadaha oo la bilaabay in la qaado iyo khariidadda afarta tallaabo ah ee dawladda ayaa bixineysa dariiq dib logu noqonayo nolosha caadiga ah.

Guusha barnaamijka tallaalku waa hal arrin - illaa iyo hadda in ka badan 17 milyan oo qof ayaa laga tallaalay - laakiin sinaba sheekada oo dhan uma aha. Dadweynaha ayaa sidoo kale u kacay howsha ah ka guulaysiga COVID-19: iyaga oo addeecaya sharciga; joogaya guriga; la baarayo markii loo baahdo; is go'doominaya markii loo baahdo, iyo iyaga oo raacaya hagidda 'gacmaha, wejiga, kala fogaanshaha' iyo 'soo gelinta hawada nadiifka ah'.

Isku soo wada duub, tani waxay ka dhigan tahay in kasta oo tirada kiisaska saxda ah ay wali yara sarreeyaan, waxaan awoodi doonnaa inaan bilowno dabcinta xayiraada adag ee hadda jira. In kasta oo ay tahay inaan dhammaanteen feejignaano - gaar ahaan ka hortagga khatarta ka imanaysa noocyada cusub ee COVID-19 - oo aan welina sii wadno ilaalinta NHS, hadana ka bixitaan aammin ah oo laga baxayo xayiraadda ayaa bilaaban karta. Waxay ku dhici doontaa afar tallaabo; marka la joogo tallaabo kastana, waxaan qorsheyneynaa inaan ka qaadno xaddidaadaha guud ahaan England isla hal waqti.

Markii aan fulinayno qorshahan waxaa na hagi doona xog, ee nama hageyso taariikho, si aanan khatar u gelin in uu bato caabuqyada kuwaas oo culeys aan la xamili karin saari kara NHS-ta. Sababtaas awgeed, dhammaan taariikhaha khariidadda waa kuwo wax tilmaamaya waana ay is beddeli karaan. Waxaa jiri doona ugu yaraan shan toddobaad inta u dhaxeysa tallaabo kasta: afar usbuuc oo loogu talagalay xogta sayniska si ay u muujiso isbeddelada xaddidaadaha iyo in la falanqeeyo; oo ay ku

xigto ogeysiis hal toddobaad ah oo ku saabsan xaddidaadaha la fududeyn doono.

Kaliya markay dowladdu hubto inay badbaado tahay in laga gudbo tallaabo loona gudbo tallaabada xigta ayaa go'aanka ugu dambeeya la gaari doonaa. Go'aanka wuxuu ku saleysnaan doonaa afar baaritaan: barnaamijka fidinta tallaalka oo si guul leh u sii socda; caddaynta oo muujineysaa in tallaalladu ay si wax ku ool ah u yareeyaan isbitaal gelidda iyo dhimashada kuwa la tallaalay; Heerarka caabuqyada oo aan wax khatar ah gelineyn kor u kicidda isbitaal gelida taas oo culeys aan la xamili karin saareysa NHS-ta; iyo qiimeynteena halisaha oo aan asal ahaan aysan beddeleyn welwelka noocyada cusub.

Dawladdu waxay sii wadi doontaa inay ilaaliso shacabka iyada oo hubinaysa in dillaaca cudurka ee maxalliga ah si dhakhso leh oo wax ku ool ah loo maareeyo iyo inaan kala dagaallanno noocyada cusub oo khatarta ah, gudaha UK iyo xuduudkaba. Dawladdu waxay sidoo kale sii wadi doontaa inay taageerto qoysaska iyo ganacsiyada dhammaan tallaabooyinka lagu xusay khariidada - faahfaahinta ayaa uu Wasiirka Maaliyadda ku sheegi doonaa miisaaniyadda 3-da Maarso.

2. Afar tallaabo

Tallaabada 1, ahmiyaddeena ayaa ah inaan hubino in dhammaan carruurta iyo ardayda ay si badbaado ah ugu soo laabtaan waxbarashada fool ka foolka ah ee iskuulada iyo kuliyadaha laga bilaabo 8-da Maarso. Xannaanada carruurta iyo waxqabadyada la kormeero ee carruurta ayaa sidoo kale dib u bilaabmi kara meeshii lagama maarmaan u ah inay waalidiinta u suurta geliso inay shaqeeyaan ama galaan hawlo la mid ah Waxaan soo bandhigeynaa laba jeer-todobaadkii baaritaan degdeg ah oo loogu talagalay ardayda dugsiyada sare iyo kuliyadaha - marka lagu daro baaritaanka joogtada ah ee dhammaan macallimiinta - si loo yareeyo fursadda fayrasku ugu faafo iskuulada.

Ardayda Tacliinta Sare ee jaamacadaha Ingiriisiga ee koorsooyinka gacan ka qabadka leh waxay sidoo kale soo laaban karaan laga bilaabo 8-da Maarso.

Dadka waxaa loo oggolaan doonaa inay ka baxaan guriga si ay ugu baashaalaan oo ay ula jimicsadaan banaanka reerkooda ama goobodooda taageero, haddii ay xaq u leeyihiin, ama ay la sameeyaan hal qof oo ka baxsan qoyskooda. Deganayaasha guryaha daryeelka ayaa sidoo kale loo oggolaan doonaa hal soo-booqde oo joogto ah.

Caddayntu waxay muujineysaa inay ka badbaado badan tahay inay dadku ku kulmaan meel bannaanka ah halkii ay ku kulmi lahaayeen meel

gudaha ah. Arintanina waa sababta laga bilaabo 29-ka Maarso, markay badanka dugsiyadu bilaabaan inay aadaan fasaxa ciidaha Easter-ka, kulamada meelaha bannaanka ah (oo ay ku jiraan beero gaar loo leeyahay) oo ama 6 qof (Xeerka 6) ama 2 qoys sidoo kale loo oggolaan doonp, taas oo u sahlaysa asxaabta iyo qoysaska inay meelaha bannaanka ah ku kulmaan.

Goobaha ciyaaraha meelaha bannaanka ah sida tennis-ka iyo garoomada kubbadda koleyga, iyo barkadaha lagu dabaasho ee hawada furan, ayaa sidoo kale loo oggolaan doonaa inay dib u furmaan, dadkuna waxay awood u yeelan doonaan inay ka qaybqaataan ciyaaraha meelaha bannaanka ah oo si rasmi ah loo soo abaabulo.

Sharciga 'joog guriga' wuxuu dhammaan doonaa 29-ka Maarso laakiin xaddidaado badan ayaa sii jiri doona. Dadku waa inay ku sii shaqeeyaan guryahooda halka ay awoodaan oo ay yareeyaan tirada safarada ee ay sameeyaan markii ay suurtagal tahay, iyagoo la iska ilaalinayo safarka dariiqyada iyo waqtiyada ugu mashquulka badan. Socdaalka dibadda mamnuuc ayuu sii ahaan doonaa, marka laga reebo tiro yar oo sababo la oggol yahay ah. Fasaxyada dibadda lama oggolaan doono, maadaama ay muhiimad gaar ah sii lahaan doonto maareynta halista noocyada kala duwan ee dibadda laga keeno iyo ilaalinta barnaamijka tallaalka. Dawladdu waxay bilowday gudi howleed cusub oo dib u eegis ku sameeya socdaalka adduunka oo soo warbixin doona 12-ka Abriil.

Tallaabada 2, ugu horeyn 12-ka Abriil, ayaa arki doontaa, furitaanka tafaariiqda aan muhiimka ahayn; goobaha daryeelka shakhsiga sida timo jarayaasha iyo meelaha lagu qurxiyo ciddiyaha; iyo dhismayaasha dadweynaha, oo ay ku jiraan maktabadaha iyo xarumaha bulshada. Goobaha damaashaadka ee meelaha gudaha ah sida goobaha jimicsiyada ayaa sidoo kale dib loo furi doonaa (laakiin waxaa kaliya loo isticmaali karaa dadka kaligood ama kooxaha qoysaska); sida inta badan meelaha soojiidashada leh ee bannaanka ah oo ay ku jiraan goobaha marti-gelinta ee bannaanka ah, xadiiqooyinka, jardiinooyinka damashaadka, iyo shineemooyinka gawaarida lagu daawado. Hoyga iskiis u wada dhan sida kaamamka iyo guryaha fasaxyada la kireysto, oo meelaha gudaha ah aan lala wadaagin qoysaska kale, sidoo kale waa la furi karaa.

Goobaha martigelinta waxaa loo oggolaan doonaa inay dadka ugu adeegaan meelaha bannaanka ah iyadoo ku saleysan Tallaabada 2 mana loo baahnaan doono in ay macaamiisha dalbadaan cunno mug leh oo ay la socdaan cabbitaannada khamriga leh loomana baahan doono bandow, in kasta oo ay tahay in macaamiisha ay dalbadaan, wax ay cunaan oo cabbaan inta ay fadhiyaan ('miis adeegga'). Xeerarka ka ballaaran ee xiriirka bulshada ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan goobahaas si looga hortago is-dhexgalka meelaha gudaha ah ee u dhexeeya qoysaska kala duwan.

In kasta oo aaska uu sii socon karo ilaa 30 ka qeybgalayaal, tirada dadka awooda inay xaadiraan aroosyada, soo dhaweynta iyo munaasabadaha kale sida xuska ayaa kor loogu qaadi doonaa 15.

Iyada oo qayb ka ah Tallaabada 3, ugu horeyn 17-ka Maajo, dowladdu waxay eegi doontaa inay sii wado fududeynta xaddidaadaha aragtida asxaabta iyo qoysaska mar kasta oo suuragal ah, iyadoo dadka u oggolaaneysa inay go'aan ka gaaraan heerka ugu habboon ee halista duruufahooda.

Arintani waxay ka dhigan tahay in inta badan xaddidaadaha sharciga ah ee kula kulanka dadka kale meelaha bannaanka ah la qaadi doono - in kasta oo isu imaatinka in ka badan 30 qof ay sharci darro sii ahaan doonto. Meelaha gudaha ah, Xeerka 6 ama 2 qoys ayaa lagu dabaqi doonaa - waxaan dib u sii eegi doonaa inay badbaado tahay in la kordhiyo iyo in kale.

Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah oo aan ka dambaynayn Tallaabada 3, waxaan sidoo kale cusbooneysiin doonaa talooyinka ku saabsan kala fogaanshaha bulshada u dhexeysa asxaabta iyo qoyska, oo ay ku jirto shaf isa saarka. Laakiin ilaa laga gaaro waqtigan, dadku waa inay sii wadaan kala fogaanshaha qof kasta oo aan ka tirsanayn qoyskooda ama goobodooda taageero.

Inta badan ganacsiyada dhammaantood aan ka aheyn qaybaha halista ugu badan ayaa dib u furmi doona. Dhammaan qeybaha, hagida ka badbaado-qabka COVID ayaa sii jiri doona meheradahana waa in aysan u adeegin kooxo ka badan xadka sharciga. Goobaha martigelinta gudaha ah ayaa dib loo furi doonaa - sida ay qabto Tallaabada 2aad, goobaha looma baahna inay bixiyaan cunno mug leh oo ay la socoto cabbitaannada khamrada leh; mana jiri doono bandow. Si kastaba ha ahaatee, macaamiishu, waa inay dalbadaan, cunaan oo cabbaan inta ay fadhiyaan.

Goobaha kale ee gudaha ah waxay ku furmayaan Tallaabada 3 waxaa ka mid ah goobaha madadaalada ee gudaha ah sida shineemooyinka iyo meelaha ay caruurta ku ciyaaraan; qaybta kale ee aaga hoyga, oo ay ku jiraan hoteelada, hosteelada iyo B & Bs; iyo fasallada ciyaaraha iyo jimicsiga kooxaha ee meelaha gudaha ah. Dawladdu waxay sidoo kale u oggolaan doontaa bandhigyada waaweyn iyo dhacdooyinka ciyaaraha ee goobaha gudaha ah oo qaadi kara 1000 qof ama inay kala bar buuxaan (hadba kii tiro yar), iyo goobaha bannaanka ah oo qaadi kara 4,000 qof ama inay kala bar buuxaan (hadba kii tiro yar). Goobaha la fariisto ee ugu waaweyn oo bannaanka ah, halka dadka lagu fidin karo, ilaa 10,000 oo qof ayaa xaadiri kara (ama inay afar meelood meel buuxaan, hadba kii tiro yar).

Ilaa 30 qof ayaa ka qeyb gali kara aroosyada, soo dhaweynta iyo xuska, iyo waliba aaska. Xaddidaadan ayaa sidoo kale lagu dabaqi doonaa noocyada kale ee dhacdooyinka nolosha ee muhiimka ah oo ay ku jiraan

bar mitzvahs (xafladaha qaangaarka yuhuuda) iyo christenings (xafladaha walqalka masiixiga).

Ugu dambeyntii, ka hor intaan Tallaabada 4 bilaaban, dowladdu waxay dhameystiri doontaa dib u eegista kala fogaanshaha bulshada iyo tallaabooyinka kale ee muddada dheer ee la diyaariyey si loo gooyo gudbinta. Arintani waxay wax ku biirin doontaa go'aamada ku saabsan waqtiga iyo duruufaha sharciyada ku saabsan 1 mitir iyo ka badan, xirashada weji-daboolka iyo tallaabooyinka kale ee la qaadi karo. Arintani waxay sidoo kale wax ku biirin doontaa hagidda ku shaqeynta guriga - kaas oo loo baahan yahay in uu sii socdo mar kasta oo suurtagal ah illaa dib u eegiddan laga dhammaystirayo.

Marka la gaaro Tallaabada 4 oo dhici doonta ugu horeyn 21-ka Juun, dowladda waxay rajeyneysaa inay awood u yeelato inay qaaddo dhammaan xaddidaadaha sharci ee xiriirka bulshada.

Waxaan rajeyneynaa inaan dib u furno dhismayaasha haray, oo ay ku jiraan goobaha habeenkii lagu caweeyo, oo aan fududeyno xaddidaadaha munaasabadaha waaweyn iyo bandhigyada lagu dabaqo Tallaabada 3. Tani waxay hoos imaan doontaa natiijooyinka Barnaamijka Cilmi-baarista Dhacdooyinka sayniska si loo baaro natiijada dhacdooyinka tijaabada ah qaarkood illaa guga iyo xagaaga, halkaas oo

aan ku tijaabin doonno isticmaalka baaritaanka iyo farsamooyinka kale si loo yareeyo halista caabuqa. Isla Barnaamijka Cilmi-baarista Dhacdooyinka ayaa hagi doona go'aannada ku saabsan in dhammaan xaddidaadaha laga qaadi karo aroosyada iyo dhacdooyinka kale ee nolosha.

Markaan ku sii soconno mid kasta oo ka mid ah wejiyadaan ku xusan khariiddada, waa inaan wada xusuusannaa in COVID-19 ay weli tahay qayb ka mid ah nolosheena. Waxaan ku qasbanaaneynaa inaan sii wadno ku noolaanshaha nolol ka duwan sidii hore si aan nafteena iyo kuwa kaleba u badbaadin lahayn. Waa inaan sii wadnaa 'gacmaha, wejiga, kala fogaanshaha'. U hoggaansannaa tallaabooyinka ka badbaado-qabka COVID ee weli sii jira. Dibadda ku kulnaa marka aan awoodno siina wadnaa u ogolaanshaha soo gelitaanka hawo nadiif ah. Is-baar markii loo baahdo. Is tallaal markii lagu yabooho. Haddii aan dhammaanteen sii wadno inaan doorkeenna ciyaarno, waxaan u sii yara dhowaan doonnaa mustaqbal aan ka sii naqaanno kan maanta.